



Maajo 1, 2020

Ku socoto: Barnaamijyada Naafooyinka Koboceed ee Bulshada (CDDPs), Dallaaliinta, Bixiyayaasha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socoto: Lilia Teninty, Agaasime, Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Koboceed

Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Koboceed (ODDS) dhawaan wuxuu diyaariyey xaashida xaqiiqda ee "[Ogaanshaha Xuquuqdaada muddada COVID-19.](#)" Xaashidan xaqiiqdu waxay dadka ka caawinaysaa inay ogaadaan la xuquuq yihiin dhanka daawaynta caafimaadka cid kale oo kasta:

- Waxaad aadi kartaa takhtar ama isbitaal sida dadka kale. Haddii aad leedahay astaamaha COVID-19 wac dhakhtarkaaga si laguugu hago waxa aad sameyn doontid. Dib u soo celi wicitaanka haddii aad ka sii darto.
- Uma baahnid wax aad isbitaalka uga baahnayn inaad saxiixdid.
- Laguugu ma diidi karo daweyn caafimaad naafonimaada awgeed.

Sidoo kale waxa kujira xoogaa talooyin caafimaad oo faa'ido u leh isku diyaarinta booqashada ama daawaynta caafimaad. Waxay bixisaa talooyinka isku diyaarinta ballanta caafimaadka, sida hubinta in qofku uu diiwaangaliyey rabitaankiisa daawaynta, iyo qalabka uu qofku u baahan karo si uu xiriir u sameeyo.

Sidoo kale waxa jirta [xaashida khayraadka oo wehelisa](#). Fadlan si ballaaran u wadaag xaashiyahan xaqiiqda. Sidoo kale waxa lagaga heli karaa luuqado badan websaytka ODDS COVID-19 halka ka hoosaysa resources for individuals and families.

Waa muhiim dadku inay yaqaanaan xuquuqdooda. Qorshe hore ugu sii deji waxa dhici kara haddii qof gurigaaga ku nooli u baahdo inuu cusbitaal

aado. Dadka qaba naafooyinka garasho iyo koboceed waa inay la xiriiraan saaxiibada, qoyska iyo dadka ka caawin kara taageerada rabitaanadooda haddii ay dhacdo inay bukoodaan.

Sidoo kale, Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu dhawaan sii daayey [tilmaamaha boogashada ee cusub](#) ee dadka ku sugan cusbitaalka. Tilmaamahan waxay u tixgaliyaan wakiilada ama daryeelayaasha dadka naafada ah booqdayaasha daruuriga ah haddii qofku u baahdo taageero si uu u fududeeyo daawaynta ama uu u ilaaliyo badbaadada qofka iyo shaqaalaha cusbitaalka.

Aynu ka wada shaqayno ilaalinta badbaadada cid kasta!

Daacadnimo,



Lilia Teninty  
Agaasime  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

*Farriimaha Agaasimihii Hore waxa laga heli karaa halkan*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo booqo websaytkayaga.*

Waxaad ku heli kartaa dokumentigan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidayso. Kala xiriir Xafiiska Oregon ee Adeegyada Naafooyinka Koboceed 503-945-5811. Waannu qabanaa dhammaan wicitaanada gudbinta ama waxaad wici kartaa 711.